

## **Degmo Dugsiyeedka Magaalo Waynta Cleveland Labbiska iyo Muuqaalka/Dharka Waxbarashada ku Habboon ee la Filayo**

Mas'uuliyadda labbiska iyo muuqaalka ardayga waxaa ugu horreyntii mas'uuliyadeedu ay saaran tahay ardayga iyo waalidiintooda ama mas'uuliyiintooda. Iyadoo la danaynayo in la ilaaliyo jawi waxbarasho oo ammaan iyo badqab leh, degmo dugsiyeedka waxay aaminsan tahay mabaadi'dan aasaasiga ah ee soo socota:

- Dhammaan ardayda oo dhan waxaa lagu dhiirigelinayaa inay u soo labbistaan qaab waxbarashada ku habboon, nafis leh kuna habboon maalin dugsiyeed firfircoon.
- Ardayda waa inay awooddi karaan inay soo xirtaan dhar iyaga oo aan ka baqaynin in lagu canaanto ama in lagu caayo.
- Xeerka labbiska ardayga u degsan waa inuu ahaadaa mid caawiya ardayda oo dhan si ay u horumariyaan muujin jir oo habboon.
- Xeerka labbiska iyo muuqaalka ee degmo dugsiyeedka waa mid dhexdhexaad jinsi oo waxay si siman u khuseysaa dhammaan iyadoon loo eegeyn jinsiga ka jira xarumaha dugsiga iyo hawlaha dugsigu uu kafaalo qaaday waxaana si joogto ah oo si caddaalad ah u dhaqan gelin doona dhammaan xubnaha shaqaalaha dugsiga.

Tusaalooyinka dharka aanan habboonayn waxaa ka mid ah:

- dharka muujinaya barida ama jirka soo gaara, tusaale ahaan, dharka jirka kor aan daboolayn ee xabadka ku eg, shaararka nuska ah, dharka dusha dambe xariga ka ah
- dhar la iska arki karo. (dharku waa inuu noqdaa mid aan muuqan)
- dhar ama waxyaabo la xirto oo muujinaya aflagaado, ereyo fisqi ah ama sawirro, hadallo dhiirrigelin galmo ah, rabshad ama rabshad kicin
- dharka matalaya howlo baando la xiriira
- dhar barta bowdada oo dhan ay ka muuqato, sida surwaal ama surwaalo aad u gaagaaban.
- dharka lagu qubaysto ama jeexjeexan
- xirashada iyo haysashada waxyaabaha xayeysiinta tubaakada, ama waxyaabaha dhiirrigeliya walxaha la xakameeyo (daroogada) iyo/ama aalkolada
- dharka laga dhex arkayo dharka gudaha ee aad ka xiran tahay
- dharka leh qoraal ama muuqaallo dhaleecayn oo naxariis-darro ah, xoogsheegasho, waxay ka dhigan tahay dhibaataayn ama takoorid
- kabaha waa in lagu xirtaa inta lag joogo iskuulka iyo dhammaan hawlaha iskuulka oo dhan
- ma la xiran karo kobo gadaal ka furan ama faraha ay banaanka yaaliin

Waxaa intaa dheer, hoggaanka goobta (guddi hoosaad UCC iyo hal waalid) oo rayi-ururin ka wada waalidiinta, ayaa laga yaabaa inay dejiyaan qaab u gaar ah goobta labbiska ee xaaladaha soo socda:

- A. Wakhtiyada ay ardaydu ku hawlan yihiin hawlaha ka baxsan manhajka ama hawlaha kale ee dugsiga gaarka ah iyo meesha labbiska iyo xeerka muuqaalka aan ku habboonayn hawsha.
- B. Waqtiyada ay ardaydu ku hawlan yihiin koorsooyin gaar ah oo loo baahan yahay in wax laga beddelo si loo hubiyo ammaanka ardayda ku hawlan fasalka. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah cilmiga shaybaarka, waxbarashada jirdhiska, fasallada CTE ama fasallo kale oo ay ku jiraan khataro ay ka iman karaan.
- C. Dugsiyadu waxay meeshooda si gaar ah ay ugu degsan karaan bedelaad la xiriira koofiyadaha, koofiyadaha (caps) iyo marooyinka madax lagu daboolo. Ma jiri doonto wax xaddidyo ah ee lagu soo rogayo dadka xirta xijaabyada madax lagu daboolo ee u xirto niyad wanaag ee ulajeedo diimeed.
- D. Goob kasta oo dugsi, iyada oo la raacayo Hanaanka Dib-u-eegista Xeerka Labbiska ee Degmo Dugsiyeedka u degsan (sida uu faray Guddiga Xeerka Labbiska, oo kulma hal simistir) ayaa laga yaabaa inay soo saarto tilmaamo dheeraad ah oo ka adag xeerka ugu yar ee labbiska iyo muuqaalka degmo dugsiyeedka ay dejisay; si kastaba ha ahaatee, waxyaabahan lagu soo kordhiyay xeerka labbiska ee goobta-gaarka ah waxaa laga yaabaa inaysan ka hor imaanayn xeerka labbiska iyo muuqaalka degmo dugsiyeedka ee lagu tilmaamay dukumintigan. Iskuullaadka ayaa ka mas'uul ah inay raacaan xeerarka ay degmo dugsiyeedka dejisay ee la aqoonsaday ee ku saabsan ogeysiinta ardayda iyo waalidiinta wixii si gaar ah iskuulkoodu loogu soo kordhiyay.

### **Cawaaqibta Xadgudubyada Xeerka Labbiska iyo Muuqaalka**

Xadgudubyada xeerka labbiska iyo muuqaalka ayaa noqon doona kuwo cawaaqib joogto ah oo siman qof kasta u qaban doona. Aysan ka ahayn duruuf qaar, ka -hakinta ama soo burinta/cayrinta looma isticmaali doono sababtaas awgeed ee xadgudubka xeerka labbiska.

Shaqaalaha Dugsiga waa inay ardayda siiyaan fursad ay ku hagaajiyaan gefka ardayga uu galay. Fursadaha dib u hagaajinta xadgudubka waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku koobnayn oo kaliya, in lala xiriiro waalidka, la siiyo dhar ay ku bedeshaan u -gudbinta Kooxda Taageerada Ardayga (SST), ama Isuduwaha Say yes. Anshax daro kasta oo ka yimaada xadgudubyada xeerka labbiska ma aha inuu noqdo mid ardayga uu ku waaya wakhti waxbarasho oo waa in taas hadal looga dhigaa in ardayga casharbxin ayna ka lumin.

**Xadgudubka Koowaad:** Maamulaha, ama wakiilka (ma aha xubin CTU ka tirsan), ayaa wici kara waalidka/mas'uulka. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu wax kaga qabto xaaladda, taas oo ay ku jiri karto dhar bedelasho, haddii la heli karo, sida shaatiga dibedda loo rogi karo, ama xal kale oo suuragal ah. Digniin afka ah oo la siiyo.

**Xadgudubka Labaad:** Maamulaha, ama wakiilka (ma aha xubin CTU ka tirsan), ayaa wici doona waalidka/mas'uulka. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu wax kaga qabto xaaladda, taas oo ay ku jiri karto dhar bedelasho, haddii la heli karo, sida shaatiga dibedda loo rogi karo, ama xal kale oo suuragal ah. Digniin qoraal ah ayaa la siinayaa.

**Xadgudubka (yada) soo Raaca:** Maamulaha, ama wakiilka (ma aha xubin CTU ka tirsan), ayaa wici doona waalidka/mas'uulka. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu wax kaga qabto xaaladda, taas oo ay ku jiri karto dhar bedelasho, haddii la heli karo, sida shaatiga dibedda loo rogi karo, ama xal kale oo suuragal ah. Waxaa la qaban doonaa shir lala yeesho waalidka. Ciqaab ahaan waxaa laga fekirayaa in iskuulka lagu hayo.

Haddii waalidka/mas'uulka ama ardaygu aanu ku raacsanayn go'aanka maamulaha ee ku saabsan ciqaabta xad-gudubka caadiga ah, waalidka/wakiilka ama ardaygu waa inay isku dayaan inay xalliyaan dhibaataada iyaga oo codsanaya shir waji-ka-waji ah oo lala yeesho maamulaha iskuulka. Haddii dhibaataada aan lagu xalin karin si aan rasmi ahayn oo ku qanacsan waalidka/mas'uulka ama ardayga, go'aanka maamulaha iskuulka waxaa laga yaabaa in rafcaan looga qaato wakiilka Xoghayayaasha Fulinta (CEO) kaasoo go'aankiisu noqon doono go'aan kama dambeys ah.

**Xadgudubyada Halista ah ama Khalkhalka leh:** Ku-xadgudubka labbiska ama muuqaalka kaas oo sababa carqalad dhab ah oo ku timaadda jawiga waxbarashada, taasoo keenta ku-xad-gudub dhab ah oo sharciga ama xeerarka kale ee dugsiga ka soo horjeeda, oo ay ku jiraan sharciyada dambi-nacaybka, ama sababa dhaawac dhab ah ay keeni karto, marka ay go'aan ka gaaraan Maamulka degmo dugsiyeedka, maamulku wuxuu qaadi karaa tallaabo adag oo edbin ah , ilaa iyo ay ka mid tahay cayrinta iyada oo aan loo eegin xeerka kor ku xusan ee xadgudubyada caadiga ah. Hanaanka rafcaanqaadashada ee xadgudubyadan halista ah ama carqaladaynaya waa inuu waafaqsan yahay habraaca edbinta degmo dugsiyeedka ee caadiga ah.

### **Ka Baxsan Xeerarka**

Guud ahaan, xeerarkan labbiska dhexdhexaadka ah ayaa qaban doona dhammaan ardayda iyada oo aan loo eegin duruufaha shaqsiyeed. Si kastaba ha ahaatee, labbisyada diimeed, shuruudaha caafimaad ama sababo kale ayaa laga yaabaa in sabab loogu dhigo in qofka looga cafiyo xeerka Dharka Caadiga iyo Muuqaalka ay degmo dugsiyeedka dejisay iyadoo oggolaansho hore oo gaar ah laga helo degmo dugsiyeedka. Codsii ku saabsan ka -dhaafitaan fulinta qayb cayiman oo Dharka Heerka degmo dugsiyeedka ah & Xeerka Muuqaalka ayaa loo gudbin karaa maamulaha. Marnaba ma jiri doonto in maamulaha u oggolaan doona in la fasaxo dharka muujinaya astaamaha burcadda/baandooyinka, adeegsada aflagaadada, soo bandhiga badeecadaha ama halku-dhigyada dhiirrigeliya tubaakada, khamriga, maandooriyaha ama jinsiga, wax u dhimaya shaqada dugsiga ama abuuraya halis amaan.

### **Dharka Baandooyinka La Xiriira**

Dharka la xiriira burcadda lama aqbali karo. Haddii dugsiyo gaar ah uu u degsan yahay xeer labbis oo mamnuucaya dharka la xiriira baandooyinka ee dugsiga ama ciyaaraha dugsiga, maamulaha, shaqaalaha iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ka qayb qaadanaya horumarinta qorshaha badbaadada dugsiga ayaa qeexaya "dharka la xiriira baandooyinka" waxayna ku xaddidi doonaan qeexitaankan dharka si macquul ah loo go'aamin karo inuu halis ku yahay caafimaadka iyo badbaadada jawiga dugsiga haddii la gashan lahaa ama lagu soo bandhigi lahaa dhismaha dugsiga.

Maamulayaashu waxay la wada-shaqayn doonaan Hayadaha/ururada u Xilsaaran adeega Nabadsugida si ay u cusboonaysiiyaan isbeddelada dharka la xiriira baandooyinka marka la gaaro bilowga simistar kasta ama hadba sida loogu baahdo. Sababtoo ah astaamaha la xiriira baandooyinka ayaa si joogto ah isu beddelaya, qeexidda dharka la xiriira baandooyinka waa in dib loo fiiriyaa ugu yaraan hal simistir kasta oo la cusbooneysiisaa mar kasta oo la helo macluumaadka la xiriira.

### **Yunifoomka**

Dugsiyada la isaga baahan yahay yunifoomka dugsiga oo dhan, maamulaha, shaqaalaha, iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta dugsiga gaarka ahi waa inay si wadajir ah u doortaan yunifoom gaar ah, iyo isku marka labiska ee la xiranayo.

Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waa inuu waalidiinta/mas'uuliyiinta uu siiyaa ugu yaraan laba toddobaad ogeysiis ka hor inta aan la dhaqan gelin sharciga labbiska dugsiga.

Waalidiinta/mas'uuliyiinta waa in lagu wargeliyaa xaqa ay u leeyihiin in ilmahooda laga dhafo sharciga labbiska dugsiga. Ardayga uu waalidkiisa/waalidkeeda/mas'uulkiisa/mas'uulkeeda ka reebay

kaqeybgalka xeerka labbiska iskuulka waa inuu u hogaansamo qawaaniintaan iyo xeerarka labbiska ee qaaska u ah ee iskuulka lagu qaato.

Xoghayayaasha Fulinta (CEO) ama qofka loo xilsaaray ayaa dejin doona shuruudo lagu go'aaminayo u-qalmitaanka ardayga ee kaalmada maaliyadeed marka la iibsanaayo yunifoomyada.

Xoghayayaasha Fulinta (CEO) ama qofka loo xilsaaray waa inuu dejiyaa qaab dib loogu wayneeyo ama u beddelashada labbiska maadaama ay ardaydu ku yaraaday dharka.

Ardayda kaqeybqaadata urur dhalinyaro aqoonsi qaran leh ayaa loo ogolaan doonaa inay xirtaan dharka ururka maalmaha ay ururku yeeshaan kulan loo jadwaleeyay.

*Degmo Dugsiyeedka Magaalo Waynta Cleveland ma dhibaateeyo, ma cabsi galiyo, ama ma takoorto iyada oo lagu saleeyo jinsiyad, middab, isir, asal qaran, xaalad socdaal, abtirsiiin, da ', caqiido, diin, xiriir siyaasadeed, jinsi, aqoonsi jinsi ama muujinta ama macluumaadka hidaha, naafonimo maskaxeed ama jireed, jinsiyad, ujeedo galmo, xaalad waalidnimo ama guur, xaalad halyeey militari, ama aasaas kale oo sharcigu dhowro ama nidaamkiisa, barnaamijyadeeda waxbarasho ama shaqo.*